

Codsiga Ruqsadda Ku-Meelgaarka ah ee EIDBI oo Dhawaan laga Heli Doono Provider Hub

Fariintan waxaa loo diray bixiyeyaasha ku diiwaangashan Barnaamijyada Daryeelka Caafimaadka Minnesota (Minnesota Health Care Programs, MHCP) ee ka shaqeeya hay'ado ahaan EIDBI, cinwaanka iimaylka ee ku xiran hay'addooda.

Bisha Janaayo 2026, codsi ruqsad ku-meelgaar ah (provisional license) ayaa loo soo bandhigi doonaa bixiyeyaasha ku diiwaangashan MHCP ee ah hay'adaha Early Intensive Developmental and Behavioral Intervention (EIDBI).

Hay'adaha EIDBI waxay codsigan ruqsadda ku-meelgaarka ah ku dhammaystiri doonaan qalab onlayn ah oo la yiraahdo Provider Hub. Fariintani waxay wadaagaysaa macluumaad hordhac ah oo ku saabsan Provider Hub.

Ha samayn akoon Provider Hub weli. Waxaad heli doontaa iimayl kale marka qalabku diyaar kuu noqdo isticmaal.

- [Baro wax ku saabsan Provider Hub](#)
- [Dib u eeg tallaabooyinka la qaadayo iyo taariikhaha muhiimka ah](#)
- [Hel macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ruqsadeynta ku-meelgaarka ah ee EIDBI](#)

Ku saabsan Provider Hub

The Provider Hub waa aalad onlayn ah oo loogu talagalay in lagu codsado laguna maareeyo shatiyada adeegyada bulshada iyo ka-qaybgalka barnaamijyada dawladda ee la heli karo.

Waxa ay hay'adaha EIDBI ku samayn doonaan aaladda onlaynka ah

Marka codsiga ruqsadda ku-meelgaarka ah ee EIDBI laga bilaabo aaladda onlaynka ah, hay'adaha EIDBI ee ku diiwaangashan waxay u adeegsan doonaan inay buuxiyaan oo ay gudbiyaan codsiyadooda ruqsadda ku-meelgaarka ah, bixiyaan khidmadaha codsiga ruqsadda, daawadaan ruqsadaha la oggolaaday, isla markaana helaan caawimaad.

Faa'iidooyinka Provider Hub

Provider Hub adigoo adeegsanaya, waxaad awoodi doontaa inaad:

- Wakhti kasta hesho macluumaadka shatigaaga, adigoo ka gelaya qalab kasta oo ku xiran internet-ka — oo ay ku jiraan tablet-yo iyo taleefanno casri ah
- Adeegsato aaladda onlaynka ah afafka Ingiriisi, español, Soomaali ama Hmoob
- Hesho caawimaad farsamo adigoo adeegsanaya maqaallo onlayn ah iyo sidoo kale telefoon adigoo kala xiriiraya koox taageero oo maxalli ah

Wax dheeraad ah ka baro

- [Dib u eeg bogga Provider Hub](#) si aad u hesho faahfaahin ku saabsan astaamaha hadda jira, xiriirro degdeg ah oo loo maro ilaha inta badan la isticmaalo, iyo macluumaad kale.
- [Isdiiwaangeli Wargeyska Provider Hub](#) si aad u hesho cusboonaysiin ku saabsan astaamo cusub iyo kuwo la hagaajiyay ee Provider Hub, ilooyin, dhacdooyin soo socda, iyo warar kale oo la xiriira aaladda onlaynka ah. Kooxda Provider Hub waxay dirtaa wargeys qiyaastii labadii biloodba mar. **Eeg ama fiiri [wargeyskii ugu dambeeyay ee la diray Diseembar 12 \(PDF\)](#).**
- [Isdiiwaangeli si aad uga qayb gasho kulan xog-wareysi ah](#) — mawduucyadu waxa ay ka mid noqon karaan horumarinadii ugu dambeeyay ee Provider Hub, talooyin ku saabsan sida si wax ku ool ah loogu adeegsado aaladda onlaynka ah, iyo agabyo caawimaad oo cusub. Ka-

qaybgalayaashu way soo gudbin karaan su'aalo inta lagu jiro kulanka. Kooxda Provider Hub waxay qabataa kulan dadweyne oo onlayn ah qiyaastii labadii biloodba mar. **Nagu soo biir kulanka xiga Talaado, Janaayo 20, laga bilaabo 6 ilaa 7 fiidnimo.**

- [Dib u eeg Maktabadda Barashada ee Technology Resources](#) si aad u hesho caawimaad ku dhisaysa kalsoonidaada isticmaalka tignoolajiyada aad u baahan doonto si aad u isticmaasho Provider Hub. Waxaad qaadan kartaa is-qiimeyn xirfadaha tignoolajiyada ah oo aad sahamin kartaa hagaha xirfadaha tignoolajiyada. Il kasta waxa lagu heli karaa afafka Ingiriisi, español, Soomaali iyo Hmoob.

Tallaabooyin iyo Taariikho

Waqti kasta ka hor inta aadan bilaabin codsigaaga

Waqti kasta ka hor inta aadan bilaabin codsiga ruqsadda ku-meelgaarka ah ee Provider Hub:

1. Dib u eeg [Liiska Hubinta ee Codsiga Ka-hor Ruqsadeynta \(Pre-Licensing Application Checklist\)](#).

Liiskan hubinta ah wuxuu kaa caawin karaa inaad isu diyaariso buuxinta codsiga ruqsadda ku-meelgaarka ah marka uu diyaar noqdo aaladda onlaynka ah. Liiskan hubinta ah **khasab ma aha; mana aha** codsiga ruqsadda ku-meelgaarka ah. Waxaa markii [hore lala wadaagay hay'adaha EIDBI ee ku diiwaangashan bishii Diseembar](#).

2. Ururi macluumaadka soo socda:

- Lambarka Diiwaanka Isqorista (enrollment record ID) — Macluumaadkan waxaad ka heli kartaa bogga Minnesota Provider Screening and Enrollment (MPSE) adigoo galaya akoonkaaga MN-ITS.
- Lambarka Aqoonsiga Canshuurta Federaalka (Federal Employee Identification Number — FEIN)
- Aqoonsiga bixiyaha — Ama National Provider Identifier (NPI) ama Unique Minnesota Provider Identifier (UMPI). Macluumaadkan waxaad ka heli kartaa bogga MPSE ama Warqadda Soo-dhaweynta (Welcome Letter) ee ay dirtay Waaxda Adeegyada Aadanaha ee

Minnesota (DHS) markii isdiwaangelintaada markii ugu horreysay ay ansixiyeen
Barnaamijyada Daryeelka Caafimaadka Minnesota (MHCP).

Macluumaadkan waxaad u baahan doontaa si aad u “dalbato” ama u gasho codsigaaga ruqsadda ku-meelgaarka ah ee Provider Hub marka uu kuu diyaar noqdo. Keliya hay’adaha EIDBI ee ku diiwaangashan ayaa loo oggolaan doonaa inay dhammaystiraan codsiga.

Xiriirro macluumaad dheeraad ah:

- [Buugga isticmaalaha ee MPSE portal](#) — Ka hel macluumaad dheeraad ah iyo caawimaad ku saabsan sida loo isticmaalo boggan
- [MN-ITS](#) — Gal akoonkaaga MN-ITS si aad u gasho MPSE portal

3. Go’aami Wakiilka La Ogggol Yahay (Authorized Agent). Hay’adda EIDBI waa inay u magacowdaa mid ka mid ah shakhsiyaadka xukuma si uu u noqdo Wakiilka La Ogggol Yahay, (sida lagu qeexay [Xeerarka Minnesota, qaybta 245A.02, fargadda 3b](#)). Wakiilka La Ogggol Yahay waa qofka mas’uulka ka ah la-xiriirka Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota (DHS) ee dhinaca shatiga. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan doorkan ka hel bogga labaad ee [Liiska Hubinta Codsiga Ka-hor Ruqsadeynta \(PDF\)](#).

4. Wakiilka La Ogggol Yahay (Authorized Agent): Buuxi [Foomka Heshiiska Codsadaha, Aqoonsiga iyo Xaqiiqinta \(Applicant Agreement, Acknowledgement and Verification Form\)](#) adigoo joogta goobta nootaayo dadweyne (notary public). Wakiilka La Ogggol Yahay wuxuu u baahan doonaa inuu soo geliyo foomka la saxiixay lana caddeeyey (notarized) isagoo qayb ka ah codsigiisa.

5. Dib u eeg [Su’aalaha Inta Badan La Isweydiiyo ee Ruqsadeynta EIDBI \(FAQs\)](#). Boggan wuxuu wadaagayaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan habraaca ruqsadeynta.

Janaayo 2026

Dabayaaqada bishan, Dowladda Gobolka Minnesota waxay soo diri doontaa iimayl ku wargelinaya in codsiga ruqsadda ku-meelgaarka ah uu diyaar ka yahay Provider Hub. Fariintan waxaa loo diri doonaa cinwaanka iimaylka ee ku xiran hay’adda EIDBI ee ku diiwaangashan.

Kadib marka hay’addu hesho fariintan, qofka ay hay’addu u aqoonsatay Wakiilka La Ogggol Yahay (Authorized Agent) waa inuu sameeyaa akoon Provider Hub ah oo uu bilaabaa codsiga. Iimaylka ka

imanaya Dowladda Gobolka Minnesota wuxuu ka koobnaan doonaa tilmaamo ku saabsan sida tan loo sameeyo. **Ha samayn akoon Provider Hub ilaa aad hesho fariintan.**

May 31, 2026

Codsiyada ruqsadda ku-meelgaarka ah waa in lagu gudbiyaa Provider Hub ugu dambayn May 31, 2026. **Hay'adaha EIDBI ee aan gudbin codsi taariikhdan ka hor waa inaysan sii wadin hawlgalka, waxaana laga saari doonaa bixinta adeegyada EIDBI.**

Ku saabsan Ruqsadeynta Ku-Meelgaarka ah ee EIDBI

Sharci-dejinta Gobolka Minnesota waxay ku waajibisay dhammaan hay'adaha EIDBI ee ku diiwaangashan inay yeeshaan ruqsad ku-meelgaar ah.

Si aad wax badan uga ogaato:

- [Dib u eeg bogga EIDBI Licensing](#)
- [Dib u eeg Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo ee EIDBI](#)
- [Isdiiwaangeli si aad u hesho cusboonaysiin ku saabsan hirgelinta ruqsadeynta ku-meelgaarka ah ee EIDBI](#)

Haddii aad qabto su'aalo, iimayl u dir kooxda EIDBI Licensing cinwaankan eidbi.licensing.dhs@state.mn.us.